# LIISKA DEMBI KU HELIDDA EE KEENI KARA U-QALMID LA'AANTA

**Haddii aad leedahay taariikh hore oo dembiilenimo, waxay taasi keeni kartaa u-qalmid la'aan ayadoo lagu salaynaayo dheeraanta muddada ay arrintaasi dhacday.**
**Haddii aad leedahay wax keeni kara u-qalmid la'aan, BCU waxay sameeyaan tijaabo miisaamid ah si loo sameeyo go'aamin dhanka u qalmitaanka ah.**

❖ ***DEMBIYO SHAN SANO AH***: Labo ama in ka badan oo ah dembi ku helida ORS 813.010 (Gaari Wadid ayadoo Maandooriye Ku Sakhraansan (DUII)) ama 830.325 (Doon kaxeyn ayadoo Maandooriye Ku Sakhraansan (BUII)) ama xukun tacsiir ah oo hoos imaanaya sharci meel ka jira oo soo roga ciqaabo dembiilenimo oo ka dhan ah kaxeynta gaadiid ama dooni ayadoo maandooriye lagu sakhraamay, haddii labada xukun ku rididba ay dhacaan shan sano gudahooda laga soo bilaabo taariikhda ama maalinta soo gudbinta baaritaanka sooyaalka.

❖ ***DEMBIYO TOBAN SANO AH***: Xukun ku ridid tacsiir ah ama dambi yar, gudaha deegaan, aana loo liis gareyn sidii 5 sano ama joogto, haddii xukun riditaanka uu dhacay 10 sano gudahooda laga bilaabo taariikhda ama maalinta soo gudbinta baaritaanka sooyaalka.

Waxaa ku jira isku day, codsi ama shirqool ku saabsan dembi kii uu ahaadaba dambigaasi kaasi oo ka mid ah qeybtaan.

❖ ***DEMBIYADA SIDA JOOGTADA AH DIB LOOGU EEGO***: Xukun ku ridista ka dhanka ah dembi kii uu ahaadaba kaasi oo lagu liis gareeyay hoos ama wax la taaban karo oo u dhigma dembiyada Oregon oo ka dhacay deegaan kale. Waxaa ku jira isku day, codsi ama shirqool dambi lagu galayo kii uu ahaadaba kaasi oo ka mid ah qeybtaan. Xasuusnoow: haddii lagugu qaado ORS 443.004; xukun ku ridis ka dhan ah dembi kii uu ahaadaba kaasi oo qeybtaa ku jira waxaa ka dhalan karta U-qalmid la'aanta jagadaan baaritaanka sooyaalka loogu talagalay.*

Cunug meel uga tagid [ORS 163.535]
Xadgudub ka dhan ah xayawaan oo ba'an I [ORS 167.322]
Xatooyo aqoonsi oo ba'an [ORS 165.803]
Dil ba'an [ORS 163.095]
Xatooyo ba'an I [ORS 164.057]
Dil kas ah oo qof gaari lagu dhuftayoo lagu dilay [ORS 163.149]
Ku xadgudbida xayawaanka I [ORS 167.320]
Guryo gubid I [ORS 164.325]
Weerar I [ORS 163.185]
Weerar II [ORS 163.175]
Weerar III [ORS 163.165]
Guryo jabsi I [ORS 164.225]
Guryo jabsi II [ORS 164.215]
Soo gadasho ama iska sii iibinta qof ka yar 18 sano jir. [ORS 163.537]
Dayicida carruurta I [ORS 163.547]
Qasbid [ORS 163.275]
Dhilleysi qof in lagu qasbo [ORS 167.017]
Dembiyada la galo ayadoo la adeegsanaayo kombuyuutar [ORS 164.377]
Gacan ka geysashada galmo iyo anshax darro qof aan qaangaar ahayn lagula kacay [ORS 163.435]
Dhaqan xumo dembiilenimo I [ORS 163.205]
Dhaqan xumo dembiilenimo II [ORS 163.200]
Si dembiilenimo ah u heysashada qalab been abuur ah I [ORS 165.022]
Si dembiilenimo ah u heysashada aalad been abuur ah [ORS 165.032]
Dil dayacaad ku dhacay si dembiilenimo ah [ORS 163.145]
Dhiirigalinta xadgudub galmo ah oo ka dhan ah cunug I [ORS 163.684]
Dhiirigalinta xadgudub galmo ah oo ka dhan ah cunug II [ORS 163.686]
Dhiirigalinta xadgudub galmo ah oo ka dhan ah cunug III [ORS 163.687]
Been abuur I [ORS 165.013]
Xaditaanka aqoonsi dad kale leeyahay [ORS 165.800]
Galmo (haddii qof carruur ah lagu sameeyo) [ORS 163.525]
Kusoo xadgudbida khusuusiyaada shakhsi kale I [ORS 163.701]
Kusoo xadgudbida khusuusiyaada shakhsi kale II [ORS 163.700]
Afduub I [ORS 163.235]
Afduub II [ORS 163.225]
Sasabashada qof carruur ah [ORS 167.057]
Dil sabab la'aan ah I [ORS 163.118]
Dil sabab la'aan ah II [ORS 163.125]
Dil I [ORS 163.107]
Dil II [ORS 163.115]
Musuq galmo la xiriira oo onlayn ah oo lagula kaco cunug I (Haddii dambiiluhu aaminsan yahay in cunugu ka yaryahay 5 sano dambiilaha) [ORS 163.433]
Musuq galmo oo onlayn ah oo lagula kaco cunug II (Haddii dambiiluhu aaminsan yahay in cunugu ka yar yahay 5 sano dambiilaha) [ORS 163.432]
Tafaariiq xadid abaabulan [ORS 164.098]
Qarash ku bixinta arkida dabeecada dhanka galmada ah ee cunug leeyahay [ORS 163A.005]
Haysashada dukumiintiyo ama sawiro si cad u muujinaya qof carruur ah oo loo galmoonayo I [ORS 163.688]
Haysashada dukumiintiyo ama sawiro si cad u muujinaya qof carruur ah oo loo galmoonayo II [ORS 163.689]
Anshax xumo gaar ah [ORS 163.467]
Xayeesiin u samaynta galmada [ORS 167.012]
Anshax xumo shaac ah [ORS 163.465]
Iibsashada galmo in lala sameeyo qof carruur ah (Haddii maxkamadu u aqoonsato dembi galmo ama dembi labaad ama dambi xiga) [ORS 163.413]
Kufsi I [ORS 163.375]
Kufsi II [ORS 163.365]
Kufsi III [ORS 163.355]
Dhac I [ORS 164.415]
Dhac II [ORS 164.405]
Xadgudub galmo la xiriira I [ORS 163.427]
Xadgudub galmo la xiriira II [ORS 163.425]
Xadgudub galmo la xiriira III [ORS 163.415]
Weerar galmo oo ka dhan ah xayawaan [ORS 167.333]
Anshax xumo galmo la xiriirta (dembiilaha oo jira da'da 18 jirka ugu yaraan) [ORS 163.445]
Khaniisnimo I [ORS 163.405]
Khaniisnimo II [ORS 163.395]
Khaniisnimo III [ORS 163.385]
Ceejin [ORS 163.187]
Qof in adoonsi lagu lug lahaysiiyo I [ORS 163.264]
Qof in adoonsi lagu lug lahaysiiyo II [ORS 163.263]
Xatooyo I [ORS 164.055]
Xatooyada adeegyada [ORS 164.125]
Ka ganacsiga shakhsiyaadka [ORS 163.266]
U soo safrinta gobolka cunug sawiradiisa qaawan yihiin [ORS 163A.005]
Galmo sharci darro ah I [ORS 163.411]
Galmo sharci darro ah II [ORS 163.408]
U isticmaalka ilmo yar muujinta anshax xumo cad oo galmo la xiriirta [ORS 163.670]

**Dambiyada Daroogada:**
Dhammaan Sharciyada Wax Soo Saarka Warshadaha/Gaarsiinta & dembiyada [ORS Ch. 475]
Marinta shay mamnuuc ah jirka qof kale [ORS 475.910]
Siinta qof kale oo ka yar 18 sano jir wax mamnuuc ah [ORS 475C.349]
Ku qasbida qof kale inuu liqo walax mamnuuc ah [ORS 475.908]
Ciqaabaha lagu muteysto u qeybinta dad aan qaan gaar ahayn [ORS 475.906]
Ficilada la mamnuucay ee diiwaangaliyeyaasha (ka tirsan Guddiga Farmashiga) [ORS 475.914]
*XASUUSNOOW: xukun ridis la xiriirta xashiishka ma ahan PDQ haddii dacwadu aysan sii ahayn dembi*

# SHURUUDAHA DEMBIILENIMO EE KEENI KARA U-QALMID LA'AANTA

**Haddii aad leedahay wax keeni kara u-qalmid la'aan, BCU waxay qabanqaabiyaan tijaabo miisaamid ah si loo sameeyo go'aamin dhanka u qalmitaanka ah.**

**Xaalado Keeni Kara U-qalmid La'aan oo kaliya la xiriira Dembiyada Sida Joogtada ah Dib Loogu Eego:**

- o Waaran xiritaan oo wali aan la fulin wallow mar hore laga soo saaray deegaan kii uu ahaadaba
- o Xukun dib loo dhigay, xabsi ka saarid sharuud leh, ama ka qeybqaadashada barnaamij weecin ah
- o Xarig ku saabsan dembi wali baaritaankiisu socdo, dacwad ama dacwad oogid rasmi ah oo la sugaayo
- o Xarig ka dhacay deegaan kii uu ahaadaba oo qof baxsad ah lagu sameeyay kaasi oo kasoo fakaday gobol kale asagoo baxsad ka ah caddaalad in loo mariyo dembi si joogto ah dib loogu eego oo keena xukun ku ridis ama xaalado keeni kara u-qalmid la'aan.
- o Xukun ka dhacay maxkamada carruurta ee deegaan un kii uu ahaadaba ayadoo la ogaaday in qofka lagu riday uu masuul ka ahaa dembi si joogto ah dib u eegid loogu sameeyo oo keeni karay xukun in lagu rido haddii qof weyn uu galo dambigaas
- o Qof in lagu helo "dembi wixii aan ka ahayn waali"

❖ **Xaalado U-qalmid La'aan u Keeni Kara dhammaan dadka Shan Sano/Toban Sano/Dembiyada Sida Joogtada ah Dib Loogu Eego:**

- o Tijaabo ku jira hadda, cafis, ama kormeer xabsi kadib ah oo loogu talagalay xukun ku ridis keeni karta u-qalmid la'aan
- o Xadgudub kormeer xabsi kadib ah, cafis, ama tijaabin loogu talagalay xukun ku ridis keeni karta u-qalmid la'aan haddii ay dhacday xukun ridistaasi 5 sano gudahooda laga soo bilaabo maalintii ama taariikhdii la sameeyay go'aamin dhanka u qalmitaanka ah
- o Ka diiwaangalinta dambiile galay fal dambiyeed galmo la xiriira deegaan un kii uu ahaadaba (xasuusnoow: Xaaladaan waxaa ugu wacnaan kara in maxkamadu ogaatay in qof carruur ah uu galay dambi qof wayn haddii uu gali lahaa xukun lagu ridi lahaa).

**Qoraallada Ka reebida Waajibka:**

***** Haddii lagugu qaado ORS 443.004. Haddii lagugu qaado ORS 443.004, waxaa lagugu heli karaa inaad tahay Qof Aan u Qalmin meeqaamka baaritaanka sooyaalka loogu talagalay. ORS 443.004 ma ogolaato in wixii qarash dawladeed ah loo isticmaalo in lagu taageero, gebi ahaantiiba ama qeyb ka mid ah shaqaaleysiinta heer kastoo awoodeed leh shakhsi lagu riday xukun loogu talagalay mid ka mid ah hal in ka badan dembiyada sida joogtada ah dib loogu eego ee ku liis gareysan dukumiintigaan. Shakhsiyaadka lagu qaado ORS 443.004 waxaa ku jira:

- Shaqaalaha xarun caafimaad ama hayadaha dadka ku daryeela guryahooda ee bixiya daryeelka ama xiriirka tooska ah la leh macmiil
- Shaqaalaha barnaamij kii uu ahaadaba, hayad, xarun deegaan ah ama guri loogu talagalay shakhsiyaadka Naafada ka Ah Garaadka iyo Korriimada, kuwaasi oo ay ku jiraan shaqaalaha taageerada gaarka ah ee shakhsiga bixiya.
- Shaqaalaha guri lagu daryeelo Dadka Waayeelka ah ee Naafada ah (APD)
- Shaqaalaha xarumaha daryeelka deegaanka ah ee APD, xarumaha nolosha la caawiyo, ama guryaha lagu hayo dad waaweyn oo qoysas kale aqbaleen inay kusoo biiraan (xarumaha xanaanada bixiya ma lagu qaadayo ORS 443.004)
- Wixii ah adeegyada caafimaadka dhimirka/adeegyada caafimaadka habdhaqanka oo ay ku jiraan takhasusleyaasha taageerada asaaga (isticmaalka maandooriyaha bixiyeyaasha dadka ka daaweeya ayaa sidoo kale lagu qaadi karaa sharcigaan): Xukunada ka reebitaanka waajibka ee kooxdaan waxaa un ku jira Dil ba'an, Dil I, Dil II, Kufsi I, Khaniisnimo I, Galmo sharci darro ah I ama Xadgudub galmo I.

Markii daruufo gaar ahi jiraan, waxaa laguu ogolaan karaa inaad la joogto qofka aad u shaqeyso. Faahfaahino intaan ka badan oo ku saabsan ORS 443.004 waxay ku jiraan oggolaanshaha iyo shaacinta aad aqrido marka la ogolaanayo baaritaanka sooyaalka.

Liiska Ka Reebitaanka Xafiiska Dembibaaraha Guud (OIG). Xukun ku ridista qaarkood waxay dadka galinayaan liiska OIG, oo sidoo kale loo yaqaano Liiska Shakhsiyaadka iyo Hayadaha Laga Reebay. Haddii aad ku jirto liiska, uma qalantid jagooyin badan oo ah shaqo rasmi ah ama iskaa wax u qabso ku shaqeyn:

- Hayadaha daryeelka dadka guryahooda ku siiya ama hayadaha caafimaadka guriga
- Wixii xarun deegaan ah ama guri loogu talagalay Waayeelka iyo Dadka Naafada ah
- Guryaha lagu hayo dad waaweyn oo qoysas kale aqbaleen inay kusoo biiraan ee loogu talagalay Dadka Naafada Ka ah Garaadka ama Korriinka
- Shaqaalaha Daryeelka Guriga iyo shaqaalaha taageerada gaarka ah
- Shakhsiyaadka haysta shahaadooyinka Shaqaale Caafimaad Dhaqameedka

Waxaad sidoo kale ka eegi kartaa inaad liiska ku jirto https://exclusions.oig.hhs.gov/.